

# Waxaad heli kartaa caawimaad ku saabsan gudniinka gabdhaha iyo haweenka

## Markasta noo sheeg arrimaha la xiriira gudniinka iyo halistiisa

- Markasta oo aad halis u gasho in lagu gudo, waxaad u sheegi kartaa arrinkaas tusaale ahaan shaqaalaha Waaxda socdaalka, kuwa xerada qaxootiga, iskuulka ama rugta caafimaadka. Sidoo kale waa ay ku caawin karaan, xittaa haddii hore lagu soo guday.
- Gudniinka iyo halistiisa, waa sabab noqon karta in qofku uu ku helo sharciga degganaanshaha ama ciqaamadda dalkaan Finland.



## Waxaad heli kartaa caawimaad ku saabsan waxyeellooyinka ka dhasha gudniinka

- Gudniinka waxaa uu adiga kugu keeni karaa waxyeello aad u daran. Dhakhtarka ayaa ku caawinaaya.
- Sidoo kale waxaad heleysaa caawimaad, haddii arrinkaas uu kugu hayo culays dhanka maskaxda ah.

## Finland gudaheeda waa lagaa badbaadinayaa gudniinka

- Dalkaan Finland gudihiisa gudniinka gabdhaha iyo haweenka lama samayn karo, iyadoo aanay jirin sabab dhanka caafimaadka ah. Sidoo kale gudniinkaas laguguma samayn karo, xittaa haddii aad joogto meel Finland ka baxsan.
- Adiga ayaa xaq u leh inaad go'aan ka gaarto arrimaha ku saabsan jirkaaga. Cid kale ma taaban karto jirkaaga, iyagoo aan oggolaansho adiga kaa haysan. Haddii adiga lagugu sameeyo wax aadan raalli ka ahayn, hawlwadeennada Finland ayaa adiga ku badbaadinaaya, waxaadna heleysaa caawimaad.

## Haddii aad garanayso in ay jirto cid kale oo caawimaad u baahan

- Haddii uu jiro qof kale oo halis ugu jira in la gudo, waxaad u sheegi kartaa arrinkaas tusaale ahaan shaqaalaha Waaxda socdaalka, kuwa xerada qaxootiga, iskuulka ama rugta caafimaadka.
- Arrinkaas oo aad sheegto, qof kale ayaad sidaas ku caawin kartaa.

## Maxaa loola jeedaa Gudniinka?

- Gudniinka gabdhaha iyo haweenka waa jarjaris lagu sameeyo xubinka taranka. Jarjarista waxaa loola jeedaa in dusha xubinka taranka la jarjaro ama gabi ahaanba meesha laga saaro, iyadoo aanay jirin wax sabab xagga caafimaadka ah oo arrinkaas loo sameeyay.